

Qaanuunka Gunnada

Tabbabarka Shaqaalaha Cusub

Tabbabarka shaqaalaha cusub wuxuu ka kooban yahay 3 koorso: Tabbabarka Shaqada ee Shaqaalaha Cusub, Tabbabarka Aasaasiga ah ee Shaqaalaha Cusub Qaybta 1, iyo Tabbabarka Aasaasiga ah ee Shaqaalaha Cusub Qaybta 2.

Daryeel bixiyeyaasha waxaa la siin doonaa gunno kadib markay si buuxda u dhammaystiraan tabbabarka shaqaalaha cusub.

Si xaq loogu yeesho lacagta gunnada ah, dhammaan koorsooyinka tabbabarka shaqaalaha cusub waa in lagu bogaa 120 maalmood gudahooda ka dib marka lambarka adeeg bixiyaha laga helo Gobalka Oregon.

Daryeel bixiyeyaasha ayaa hal mar oo kaliya heli doona gunnada koorsooyinka tabbabarka shaqaalaha cusub, marka laga reebo inuu Gobalka Oregon faro inay ku celiyaan koorsooyinka.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan shuruudaha tabbabarka shaqaalaha cusub, fadlan booqo [CarewellSEIU503.org/so/orientation](https://www.CarewellSEIU503.org/so/orientation).

Waxbarashadda Dadka Wawayn ee

Daryeel Bixiyeyaasha Hadda Shaqeeya

Laga bilaabo Maarso 1, 2026, si ay u cusboonaysiiyaan lambarka adeeg bixiyaha, daryeel bixiyeyaasha waa inay soo dhamaystireen 12 saacadood oo waxbarashadda dadka wawayn ah.

Waxbarashadda dadka wawayn ayaa haddaba la heli karaa oo tabbabar kasta oo hadda la dhamaystiro waxaa lagu xisaabi doonaa shuruuda koowaad ee dib u cusboonaysiinta ee shaqaalaha.

Daryeel bixiyeyaasha waxay xaq u yeelan doonaan lacag gunno ah kadib markay bogaan 12-ka saacadood ee waxbarashadda dadka wawayn ee loo baahan yahay. Daryeel bixiyeyaasha ayaa hal mar oo kaliya heli doona gunnada koorsooyinka waxbarashadda dadka wawayn muddo xilleed walbo oo shahaado siin.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan waxbarashadda dadka wawayn, fadlan booqo [CarewellSEIU503.org/so/continuing-education](https://www.CarewellSEIU503.org/so/continuing-education).



Cadadka Gunnooyinka

Cadadka gunnooyinka waxay ku xiran yihiin cabbirka mushaharka ee heshiiska gorgortanka lagu galay ee SEIU 503 ee loogu talloagalay shaqaalaha daryeelka guriga iyo taageerada shaqsiyeed iyo bixiyeyaasha daryeelka shaqsiyadeed.

Tabbabarka Shaqaalaha Cusub:

- Laga bilaabo Janaayo 1, 2024: Shaqaalaha waxaa gunno lagu siin doonaa shaqada koorsada oo dhan cadad u dhigma sicirka aasaasiga ah ee mushaharka.

Eeg qaybta *Tabbabarka Shaqaalaha Cusub*, ee bogga 1, si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan shuruudaha tabbabarka shaqaalaha cusub ee saamaynta ku yeelan kara xaq u yeelashada bixinta lacagaha gunnada.

Waxbarashadda Dadka Wawayn:

- Laga bilaabo Janaayo 1, 2024: Shaqaalaha waxaa gunno lagu siin doonaa 12 saacadood oo shaqada koorsada ah oo dhan cadad u dhigma sicirka aasaasiga ah ee mushaharka.
- Laga bilaabo Luulyo 1, 2024: Shaqaalaha waxaa gunno lagu siin doonaa 12 saacadood oo shaqada koorsada ah oo dhan cadad u dhigma tallabada 2-aad ee miisaanka mushaharka.
- Laga bilaabo Janaayo 1, 2025: Shaqaalaha waxaa gunno lagu siin doonaa 12 saacadood oo shaqada koorsada ah oo dhan cadad u dhigma tallabada 3-aad ee cabbirka mushaharka.

Eeg *Waxbarashadda Dadka Wawayn ee Daryeel Bixiyeyaasha Hadda Shaqeeya*, ee bogga 1, si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan shuruudaha waxbarashadda dadka wawayn ee saamaynta ku yeelan kara xaq u yeelashada bixinta lacagaha gunnada.

Xisaabinta Gunnada:

- Tabbabarka Shaqaalaha Cusub: [Mushaharka saacadiiba ee tallaabada habboon sida kor lagu sheegay] x 14 saacadood, loona wareejiyay cadadka doolarka buuxa ee ugu dhaw
- Waxbarashadda Dadka Wawayn: [Mushaharka saacadiiba ee tallaabada habboon sida kor lagu sheegay] x 12 saacadood, loona wareejiyay cadadka doolarka buuxa ee ugu dhaw

Sicirada mushaharka waxaa laga heli karaa [Heshiiska Gorgortanka Lagu Galay ee Shaqaalaha Daryeelka Guriga ee Oregon](#).

Habka iyo Wakhtiyada Magdhawga

Gunnooyinka waxaa lagu bixiyaa oo la soo mariyaa adeeg bixiye bixiyo lacagaha oo loo yaqaano Ratable. 2 ilaa iyo 3 toddobaad gudahooda ka dib markaad bogto koorso gunno leh, waxaa iimayl kuu soo diri doona Ratable kaas oo fursad kuu siin doona inaad ku hesho gunnadaada midkood lacag wareejinta elektarooniga ah ama jeegga boostada lagu soo diro. Ka dib markaad buuxiso macluumaadkaaga, waxaad kaga heli doontaa lacagtaada Ratable 2 toddobaad gudahooda.

Gunnooyinka Lumay, Aan La Isticmaalin, ama Aan La Sheeganin:

Si lagu siiyo baddelaada gunnada luntay ama aan la isticmaalin, waa inaad ku ogaysiiso Carewell 1 sano gudaheeda oo ka soo bilaabata xilliga la kasbaday gunnada asalka ah.